



2006-07 Buugta wax-laga-barto ee la soo Xushay

Waaxda Waxbarashadda ee California waxay sameysay hab wax lagu kala doorto. Lixdii ilaa iyo siddeedii sannaba waxaa kala doorasho ama xulasho lagu sameeyaa qalabka wax lagu barto, kuwaas oo ay ka mid yihiin buugta, cajaladaha koombiyuutarka ku shaqeeya (software), buugta lagu shaqeeyo iyo Fiidiyowada. Dugsiyada degmooyinka waxaa la siiyaa miisaaniyad ardey kasta loogu talagalay inuu sannad-dugsiyeed kasta buug maaddooyinka la dhigayo ku iibsado. Kala doorashada buugaagta wax laga barto waxaa lagu sameeyaa hababkan soo socda:

- Buugaagta ay wax ka baraneyaan ardeyda fasalada X-8aad ee maaddo kasta ku saabsan waxaa soo xula guddiyi khubarro ah oo heer dawlad-goboleed ah. Dugsiyadu degmooyinku waxay shir u qabtaan guddiyadooda maaddooyinka takhsuska u leh, macallimiinta, maamuleyaasha, GATE iyo wakiilada waxbarashadda khaaska ah, waalidiinta iyo xubnaha jaaliyada kuwaas oo talooyinkooda u gudin doona degmada ee liiska buugta ay dawlad-goboleedku soo ansaxisey.
- Buugaagta ay ka baraneyaan ardeyda fasalada 9aad-12aad waxaa ka shira degmo kasta guddiyadooda si ay u eegaan buugaagta la soo jeediyey in wax laga barto iyo qalabka waxbarashadda kuwaas oo si sharciyan ah u buuxineya shuruudaha dawlad-goboleedka iyo heerarka maaddooyinka.
- Waalidiinta iyo xubnaha jaaliyada ee dooneya inay ka qeybgalaan habka loo xulanayo buugaagtsaas, fadlan waxaad la soo xidhiidhaan Waaxda Qalabka Waxbarashadda oo telefoonkeedu yahay (619) 725-7209.

Qalabka waxbarashadda ee ay degmadu dooratey waa inay ka mid yihiin:

- Waa in mawduucyada buugga ku qoran ay adag yihiin maaddadana ku salleysan yihiin
- Waa in qalabka wax lagu dhigeyo ay yihiin kuwa cilmi-baadhis lagu sameeyey oo ardeyda si wacan wax loogu bari karo
- Macluumaadka buuxineya shuruudaha loogu diyaargarobeyo gelitaanka kulleejada ee ay sameeyeen Jaamacadda California iyo Jaamacadda dawlad-goboleedka California hababka ay ku shaqeeyaan.

Sannad-dugsiyeedka 2005-2006, maaddooyinkan hoos ku qoran ayaa waxay heli doonaan qalabka waxbarashadda ee cusub ee la xushay:

Maaddada	Fasalka	Koorsooyinka
Adeegyada Caafimaadka	K-6	Caafimaadka K-6 ^{aad}
	6-8	Caafimaadka 6 ^{aad} -8 ^{aad}
Waxbarashadda Khaaska ah	8	Taariikhda Maraykan ee la Isticmaaleyo 8 ^{aad}
	7	Taariikhda Adduunka ee la Isticmaaleyo 7 ^{aad}
	K-6	Cilmiga Bulshada ee shaqeynaya K-6 ^{aad}
	6-8	Cilmiga Bulshada ee shaqeynaya 6 th -8 th
	9-12	Cilmiga Bulshada ee shaqeynaya 9 th -12 th
Farshaxanada Muuqaalka iyo Soo Bandhigista	10-12	AP Aragtiyada Muusikada ee Meeleynta Sare (AP) 1-2
	9-12	Kooxda muusikada tunta 1,2; 3,4; 5,6; 7,8
	9-12	Qalabka miuusikada 1,2
Luuqadaha Adduunka	9-12	Jabaaniiska 5-6

OO KOOBAN

Sannad-dugsiyeedka 2007-08, maaddooyinkan soo socda *ayaa qalabka waxbarashadda loo xuli doonaa:

- ❖ /Luuqadaha Adduunka
- ❖ Farshaxanada Af Ingiriisiga & Dhigista af Ingiriisiga luuqad labaad ahaan
- ❖ Xisaabta
- ❖ Dugsigu Shaqooyinka uu kuu horseedayo
- ❖ Saaynis
- ❖ Cilmiga Bulshada
- ❖ Waxbarashadda Khaaska ah
- ❖ Muuqaalka iyo Soo bandhigista Farshaxanka

*Liiskanu maaha kii ugu dambeeyey.

Warbixinada kala xidhidh: Qalabka Wax dhigista : (619) 725-7209
Su'aalaha warbaahinta: (619) 725-5578

www.sandi.net
La naqtiimay 5/2/06

San Diego City Schools (SDCS) waa kan labaad ee ugu weyn waxbarashadda degmooyinka ee California. Waxay u adeegtaa in ka badan 132,000 oo ardey. Waxay leedahay in ka badan 216 oo waxyaabaha waxbarashadda sahla ah, iyo in ka badan 14,500 jagooyin shaqo-buuxda u dhigma (oo meteleya 15,800 oo shaqaale ah.) SDCS waxay ahmiyada saartaa inay hagaajiyaan xirfadaha waxbarashadda aasaasiga ah ee xaga akhriska, qoraalka iyo xisaabta. Waxbarashadda degmadu waxay u heellan tahay inay taageero dugsiyada iyo inay kobciso jawiga waxbarashadda ee fasalka dhexdiisa ah, iyadoo adeegsanaysa qalab casri ah iyo taageerooyinka ay ka helayso hawlgalka waalidka, macallinka, iyo jaaliyada ee dhinacyada waxbarashadda. **SOMALI VERSION: 2006-07 TEXTBOOK ADOPTION**